

## Su'aalaha Soo Noqnoqda (FAQs)

### Ololaha wacyigelinta dadweynaha ee Aqoonsiga codbixiyaasha

#### Waa ayo Greater London Authority?

Greater London Authority (GLA), oo sidoo kale loo yaqaan London City Hall, waa dawlad goboleedka London, taasi oo awood awood sharci u leh Greater London iyo Magaalada London. GLA waxa ay ka koobantahay Duqa Magaalada London iyo Golaha Baarlamanka London.

#### Waa ayo Shout Out UK?

Shout Out UK (SOUK) waa hal-abuur bulsho oo dhex-dhexaad ah taas oo khabiir ku ah diirad saarista kor u qaadista warbaahinta iyo aqoonta siyaasadda ee dhalinyarada. SOUK waxa ay ahayd la hawlgalayaasha GLA - isku-dubariday Toddobaadka Diiwaangelinta Cod-bixiyaasha London inta u dhaxaysay 2020 iyo 2024.

Si dhexdhexaad ah, ololaha wacyigelinta dadweynaha ee Aqoonsiga Codbixiyaasha, SOUK waxa ay horumarin doontaa oo ay wadaagi doontaa dhammaan agabka, ay ku jiraan agabka warbaahinta bulshada iyo nuqulka baraha bulshada la soo jeediyay si loo hubiyo dhexdhexaadnimada mar kasta, iyo agabyo waxbarasho oo lala yeesho bulshooyinka iyo la-hawlgalayaasha London oo dhan iyo xarumaha waxbarashada.

#### Muxuu yahay ololaha wacyigelinta dadweynaha ee Aqoonsiga codbixiyaasha?

Xeerka Doorashooyinka (2022) waxa uu isbedel ku keenay habka aan u codayneyno iyo cidda codayn karta.

Sidaa darteed, laga soo bilaabo Jannaayo 2023, Greater London Authority iyo isbahaysiga kala duwan ee ururada bulshada rayidka ah, mac-hadyada waxbarashada iyo dhammaan adeegyada doorashada degmooyinka London ayaa isu yimid si ay u bixiyaan olole wacyigelin dadweyne oo dhexdhexaad ah. Ololaha waxa uu ujeedkiisu yahay in lagu wargeliyo dhammaan dadka reer London ee xaqa u leh, gaar ahaan kuwa aan diiwaangashanayn iyo kuwa aan matalaad haysanin ee reer London oo asal walba leh, isbeddelladan aan hore loo arag, sida:

- Faahfaahinta aqoonsiga sawirka ee waajibka ah si loogu codeeyo shaqsi ahaan Baarlamaanka/ doorashooyinka Guud, doorashooyinka dagmada/deegaanka, iyo Duqa Magaalada London/ doorashooyinka Golaha London ee London.
- Isbeddelka xuquuqda codbixinta ee qaar ka mid ah muwaadiniinta Midowga Yurub ee London
- Isbeddelka codsiyada boostada iyo codbixinta wakiillada.

Ololaha wacyigelinta bulshada ee GLA-ay hogaaminayso waxa isku dubarida Guddiga Doorashooyinka waxaana kudbisa Shout Out UK (SOUK). Iyadoo laga duulayo qaabka Toddobaadka Diiwaangelinta Codbixiyayaasha London ee sannadlaha ah, GLA iyo SOUK waxay si wadajir ah u qaabeeyeen macluumaad iyo agab waxbarasho oo loogu talo galay bulshooyinka aan matalaad haysan kuwaas oo si aan la qiyaasi karin u saameyn doonaan isbeddelladan. Agabka iyo wax-qabadka waa la wadaagi doonaa waxayna ka dhici doonta fogaan araga iyo toosba iyadoo taageerayo weyn laga helayo isbahaysiga wada-hawlgalayaasha ee pan-London.

Waxaa barbar socda, dhamaystirka hawshan, tartamayaasha ku guulaysta barnaamijka deeqaha Ka-qaygalayaasha Dimuqraadiyada ee GLA waxay waxqabad ku soo bandhigi doonaan goobaha bulshada ee lagu kalsoon yahay. Waxaad ka heli kartaa macluumaad dheeri ah GLA Democracy Hub.

### **Muxuu yahay Todobaadka Diiwaangelinta Codbixiyaasha London (LVRW)?**

Waa mashruuc gaar ah oo sanadle ah oo aan ahayn xisbi siyaasadeed, dhexdhexaadna ah, doorasho-la'aan ah oo ay maamusho Greater London Authority, iyada oo la kaashanaysa la-hawlgalayaasha gudbinta, Iskaashiga Istiraatiijiyadeed ee Diiwaangelinta Cod-bixiyayaasha London iyo isbahaysi ballaaran oo taageero ah, si loo wargeliyo loona dhiirrigeliyo reer London - gaar ahaan kuwa aan diiwaangashaneyn iyo kuwa aan matalaad haysan ee reer London - si ay isu diiwaangeliyaan si ay u codeeyaan.

### **Maxaynu tan u sameynaynaa / Sidee bay reer London u saameynayaan?**

Isbeddellada xuquuqda dimuqraadiga ah ee uu keenay Xeerka Doorashooyinka (2022) ayaa caqabado waaweyn u keenay dadka reer London ee aan hore u diiwaangashanayn iyo kuwa aan matalaad haysan, kuwaas oo qaar badan oo ka mid ah ay si ba'an u saameysay masiibada Covid iyo dhibaataada qarashka nolol maalmeedka.

London waxay hore u ahayd mid heerarka ugu hooseeya kaga jirta diiwaangelinta codbixiyayaasha ee gobollada UK iyo wadamada. Wax badan ka ogow halkan <https://data.london.gov.uk/dataset/survey-of-londoners-2021-22>

Caddayn ka socota Joseph Rowntree Foundation (Febraayo 2022), Trust for London and the 3million ("London Voices: The Journey to Full Participation", Diseembar 2021) iyo codbixinta GLA (inta u dhaxaysa Agoosto 2022 iyo Janaayo 2024) waxay tilmaamaysaa tirakoobka iyo bulshooyinka qiyaas ahaan u yar inay hastaan sawirka aqoonsiga ee la aqbalay si ay u codeeyaa. Kuwani waa:

- Dhalinyarada reer London (da'doodu tahay 18-25)
- Madowga, Aasiyaanka, Qowmiyadaha laga tirada badanyahay iyo soogalootiga reer London, oo ay ku jiraan kuwa Midowga Yurub ee reer London
- Dhagoolayaasha iyo naafada reer London
- Waayeelka reer London
- LGBTQIA+-ka reer London, oo diirada saaraya dadka jinsiga badashay ee reer London iyo kuwa labeebshaha ee London.
- kuwa daqligoodu hooseeyo ee reer London
- Kireystayaasha bulsho ama gaar ahaaneed ee reer London, iyo kuwa guri la'aanta qatarta ugu jiro oo ay ku jiraan kuwa hoy la'aanta ah ee reer London.

### **Waxaan ka walaacsanahay keenista sawirka Aqoonsiga ah si aan u codeeyo, yaan la hadli karayaa?**

GLA ma aysan soo rogin sawirka aqoonsiga lagu codeeyo kaliya waxay leedahayna awood wacyigelin waxayna isku dayeysaa inay wax ka qabato saameynaha sinnaanta.

Haddii aad tahay urur bulsho rayid oo aad rabto in aad naga caawiso faafinta wacyigelinta iyo qaybinta agabkayaga, si aan u hubinno in aan gaarno dadka reer London inta ugu suurtagalsan, fadlan la xiriir kooxda Ka-qaybgalka Dimuqraadiyadda ee GLA [democracy@london.gov.uk](mailto:democracy@london.gov.uk).

Haddii aad rabto inaad muujiso cabashadaada ku saabsan soo rogida sawirka Aqoonsiga si aad u codeeyso, waxaad iimayl u diri kartaa [correspondence@levellingup.gov.uk](mailto:correspondence@levellingup.gov.uk) ama u qor Waaxda Levelling Up, Housing and Communities, 2 Marsham Street, London, SW1P 4DF

### **Shuruudaha soo bandhigida sawirka Aqoonsiga ah si aad u codeeyso shaqsi ahaan**

**Nuucee waaye sawirka aqoonsiga ah (photo ID) ee la aqbalayo si aad u codeeyo shaqsi ahaan?**

Sawirka Aqoonsiga ee la aqbalay si aad u codeyso ma noqon karo nuuc kasta oo aqoonsi ah. Reer London waxa ay u baahan doonaan in ay haystaan oo ay soo bandhigaan **mid** ka mid ah nuucyadan sawirada aqoonsiga ee la aqoonsaday sharci ahaan sida caddaynta aqoonsiga ee loobaahan yahay si aad u codeyso:

- A United Kingdom baasaboorka
- Baasaboorka ay bixiyeen gobolada Aagga dhaqaalaha Yurub (EEA) ama wadamada Barwaaqo-sooranka.
- Kaarka aqoonsiga qaran oo ay bixiyeen gobolada EEA
- Shatiga wadista gawaarida ee UK (oo sawir leh, mid warqad ah lama aqbalayo)
- Shatiga wadista gawaarida oo ay bixiyeen Channel Islands, the Isle of Man ama gobolada EEA
- Dukumeenti socdaalka oo biometric ah
- Kaadhka aqoonsiga oo sita caddaynta Nidaamka Heerarka Da'da hologram (A Pass Card)
- Foomka 90aad ee Wasaaradda Gaashaandhigga (Kaarka Aqoonsiga Difaaca)
- Kaadhka Baska Qofka Waayeelka ah, Kaarka Baska Qofka Naafada ah, Kaadhka Oyster 60+, Kaarka Xoriyadda.
- Calaamad buluug ah.
- Shahaadada Hay'adda Cod-bixiyaha oo bilaash ah.

Fadlan ogow inaad u baahan tahay inaad hore u soo qaadato foomka sawirka aqoonsiga ee **asalka ah** goobta codeynta. Koobiga dukumentiga iyo sawir taleefankaaga ku jira lama aqbali doono.

Dadku waxay isticmaali karayaan sawirka Aqoonsiga asoo dhacsan haddii wali laga aqoonsan karo sawirka. Waxaad ka heli kartaa macluumaad dheeraad ah mareegta Guddiga Doorashada, dhammaan noocyada sawirada Aqoonsiga ee la aqbalay <https://www.electoralcommission.org.uk/voting-and-elections/voter-id>.

Haddii aysan ku jirin liiskan, sawir Aqoonsi oo kale oo ay bixiyeen dhinacyo saddexaad **looma aqbali doono** caddaynta aqoonsi oo aad ku codeyn karto.

## **Halkeen ka heli karaa macluumaad dheeraad ah iyo taageero si aan u helo sawir Aqoonsi ah oo la aqbalayo si aan u codeeyo?**

Guddiga Doorashooyinku waxa ay ku daabaceen hagitaan qaran halka <https://www.electoralcommission.org.uk/voting-and-elections/voter-id>.

Waxaad ka heli kartaa agabka ololaha Aqoonsiga Codbixiyaasha GLA ee dhexdhexaadka ah iyo macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan sida looga qayb galo GLA Democracy Hub <https://registertovote.london/>

Waxaad ka dalban kartaa, cusbooneysiin kartaa ama cusbooneysiisan kartaa shatigaaga, ka arki kartaa ama kula wadaagi kartaa shatigaaga <https://www.gov.uk/browse/driving/driving-licences>

Waxaad kaga dalban kartaa si onleyn ah baasaboorka British-ka ah halkan <https://www.gov.uk/apply-renew-passport>. Waxaad foomamka codsiyada baasaboorka ka qaadan kartaa Xafiiska Boostada ee deegaankaaga (ka hel laantaada halkan <https://www.postoffice.co.uk/branch-finder>) oona ku codso boost ahaan, ama isticmaal adeegga Xafiiska Boostada ee hubinta iyo diritaanka (waxii macluumaad dheeri ah <https://www.gov.uk/how-the-post-office-check-and-send-service-works>).

Waxaad ka heli kartaa in badan oo ku saabsan 60+ London Oyster photocard halkan <https://tfl.gov.uk/fares/free-and-discounted-travel/60-plus-oyster-photocard>

Waxaad ka dalban kartaa ama ka cusbooneysiisan kartaa Baajka Naafada halkan <https://www.gov.uk/apply-blue-badge>. Waxii su'aalo ah ee ku saabsan nidaamka Aqoonsiga Naafada kala xidhiidh golaha deegaankaaga halkan <https://www.gov.uk/blue-badge-scheme-information-council> .

Waxa laga yaabaa in Talada Muwaadiniinta ee deegaankaaga ay ku kaalmeeyso. Ka hel laanta deegaankaaga halkan <https://www.citizensadvice.org.uk/>

Waxaad ka dalban kartaa Voter Authority Certificate oo bilaash ah halkan <https://www.gov.uk/apply-for-photo-id-voter-authority-certificate>

## **Goorma ayay bilaabanaysaa shuruuda sawirka Aqoonsiga si loogu codeeyo shaqsi ahaan?**

Shuruudaha sawirka Aqoonsiga si shaqsi ahaan u codeeyso waxay ku diyaar ahayd doorashooyinka deegaanka ee England laga soo bilaabo Maajo 2023. Markii ugu horaysay ee lagu dhaqangeliyey doorashada London waxay ahayd 2-da Maajo 2024 Duqa Magaalada London iyo doorashooyinka Golaha London. Shuruudaha doorashada Baarlamaanka/ doorashooyinka Guud ee UK waxay ka dhaqan gashay doorashooyinkii 5-ta Oktoobar 2023 ka dib, iyo mid kasta oo doorasho ku celis boos shaqsi ahayd ee baarlamaanka ka dib Maajo 2023.

## **Maxaan loo aqbalayn foomamka kale ee Aqoonsiga?**

Qaanuunka sharcigu wuxuu qeexayaa nuucyada dukumeentiyada la aqbalayo ee sawirka Aqoonsiga. Waxaana kuwaas go'aan ka gaaray Dowladda UK.

Dawladda UK waxay bixisay macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan nuucyada sawirada Aqoonsiga ee la aqbalayo iyo kuwa aan la aqbaleynin, taa oo ay la socoto shuruudaha la lagu doortay. Waxaad taas ka heli kartaa <https://www.gov.uk/government/publications/voter-identification-at-polling-stations-and-the-new-voter-card/protecting-the-integrity-of-our-elections-voter-identification-at-polling-stations-and-the-new-voter-card>

## **Maxaa dhacaya haddii aan tago goobta codbixinta aniga oo aan haysan sawir Aqoonsi oo la aqbalayo?**

Haddii aad tagto goobta codbixinta si aad u codayso adoon haysan sawir Aqoonsi oo la aqbalayo, laguma siin doono warqada codbixinta oona waxaad u baahan doontaa inaad la timaado foomka sawirka Aqoonsiga ee la aqbalayo.

Haddii aad la imaato sawir Aqoonsi oo asal ah oo la aqbalayo soo laabashadaada, waxaad awood u yeelanaysaa inaad codeeyso.

## **Maxaa dhacaya haddii aanan rabin inaan tuso sawir Aqoonsi si aan u codeeyo?**

Haddii aad doorbidayso inaad ku soo muujin sawir Aqoonsi goobta codbixinta, waxaad codsan kartaa si aad u codeeyso boosto ama wakiil. Sawirka Aqoonsiga lagaagama baahna markaad codsado wakiil si aad u codeeyso laakiin wakiilkaada waxaa looga baahan doonaa inuu tuso sawir Aqoonsi oo la aqbalyo goobta codbixinta, marka ay magacaaga kuugu codeynayaa.

## **Waa Maxay faahfaahinta oo laga hubin doonaa sawirkeyga Aqoonsiga?**

Hubinta sawirka Aqoonsiga ee goobta codbixinta waxaa la eegi doonaa si loo xaqiijiso in magaca ku qoran sawirka Aqoonsigaada uu la mid yahay magacaaga kuugu diiwaangashan doorashada. Shaqaaluhu ma eegi doonaan nooca jinsiga aad tahay (nooca jinsigaaga), ciwaanka ama jinsiyadda dhalashada ee aqoonsigaaga ku qoran.

## **Magaca iigu qoran diiwaanka doorashada la mid maaha magaca iigu qoran sawirkeyga Aqoonsiga, maxaan samayn karaa?**

Haddii magaca sawirkaaga Aqoonsiga ka duwan yahay kan diiwaanka doorashada, waxaad awoodaa:

- La imaaw dukumeenti rasmi ah oo caddaynaya beddelida magaca, tusaale ahaan shahaadada guurka (iyo sidoo kale sawirkaaga Aqoonsiga)
- Waxaad uga dalban kartaa si bilaasha ah Voter Authority Certificate adiga oo isticmaalaya magaca kuugu diiwaangashan inaad ku codeeyso iyo sawir dhawaan ah <https://www.gov.uk/apply-for-photo-id-voter-authority-certificate>
- ama waxaad la xiriiri kartaa kooxdaada adeegyada doorashada deegaankaada si aad u badasho magacaga diiwaanka doorashada <https://www.electoralcommission.org.uk/i-am-a/voter/your-election-information>

## **Ma lagu hubin karaa sawirkeyga Aqoonsiga si khaas ah? Ma inaan bixiyo sababbaa?**

Haa, arintaan awgeed meel khaas ah ayaa laga helayaa goobta codbixinta. Waxaad codsan kartaa in sawirkaada Aqoonsiga si khaar ah loo hubiyo. Codsiyada noocan ah waa in loo maareeyaa si qarsoodi ah oo xushmad leh.

Maya, ma u baahnid inaad bixiso sababta codsigan, mana aha in lagu waydiiyo inaad sharaxdo sababta.

### **Waxaan ka walwalayaa isticmaalka sawir Aqoonsi oo tilmaamaya jinsigayga si aan u codeeyo, maxaan samayn karaa?**

Magaca ku qoran sawirkaada aqoonsiga waa inuu la mid ahaadaa magaca aad isku diwaangelisay inaad ku codayso. Uma baahnid inaad tusto sawir Aqoonsi uu ku jiro tilmaamaha jinsiga.

Haddii aadan haysan sawir Aqoonsi, aad ka welwelayso inaad isticmaasho nuuc ka mid ah foomamka sawirada Aqoonsiga kaas oo leh tilmaam muujinaysa jinsiga, ama aadan hubin inaad u egtahay sawirka Aqoonsigaaga, waxaad uga codsan kartaa si bilaash ah Voter Authority Certificate halkan <https://www.gov.uk/apply-for-photo-id-voter-authority-certificate>. Voter Authority Certificate malaha calaamad timaamaysa jinsiga.

### **Maxaan samayn karaa haddii sawikeyga Aqoonsiga dhumo, la xado, burburo ama waxyeelo gaarto ka hor maalinta codbixinta?**

Haddii sawirkaaga Aqoonsiga uu dhumo, la xado, burburo ama waxyeelo gaarto, isla markaana wakhtiga kama dambaysta ah ee lagu codsado Voter Authority Certificate la dhaafay, waxaad codsan kartaa codbixinta wakiilka ee degdega ah <https://www.electoralcommission.org.uk/voting-and-elections/ways-vote/apply-vote-proxy>

Tani waxay khusaysaa kaliya xaaladaha degdega ah ee dhacda kadib markii la dhaafay wakhtiga kama dambaysta ah ee codbixinta wakiilnimada. Foomkan waxa kale oo la isticmaali karaa haddii Dukumentigaaga Magac la'aanta ah ee Codbixinta uu dhumo, la xado, burburo ama waxyeelo gaarto. Codsiyadan waxa la samayn karaa ilaa 5-ta galabnimo maalinta codbixinta.

### **Voter Authority Certificate oo bilaash ah**

#### **Sidee u dalban karaa Voter Authority Certificate ee bilaashka ah?**

Haddii aadan haysan mid ka mid ah foomamka sawirada Aqoonsiga ee la aqbalayo si aad u codayso, waxaad u codsan kartaa si bilaashka ah Voter Authority Certificate. Waxa kaliya oo loo isticmaali karaa ujeedo codbixin, looma isticmaali karo qaab aqoonsi, waxayna shaqaynaysaa 10 sano. Waxaad u baahan doontaa inaad keento sawir, taariikhda dhalashadaada iyo lambarka Caymiska Qaranka oo qayb ka ah codsigaaga. Haddii aadan garaneyn lambarkaaga Caymiska Qaranka, ama aadan haysan mid, waad codsan kartaa. Golahaaga ayaa kula soo xiriiri doona si ay kaaga codsadaan caddaynta aqoonsigaaga.

Waxaad uga dalban kartaa onleyn halkan <https://www.gov.uk/apply-for-photo-id-voter-authority-certificate>

Ama waxaad ka buuxin kartaa warqada foomka codsiga [https://assets.publishing.service.gov.uk/government/uploads/system/uploads/attachment\\_data/file/1137587/VAC\\_public\\_facing.pdf](https://assets.publishing.service.gov.uk/government/uploads/system/uploads/attachment_data/file/1137587/VAC_public_facing.pdf) oona u diri kartaa golaha deegaankaaga. Waxaad ka codsan kartaa hagitaanka Daabacaad wayn, Far qoraalka dadka Araga naafada ka ah ama Akhriska Fudud.

Si aad ula xiriirto kooxda adeegyada doorashada deegaankaaga, geli koodhka boostada halkan - <https://www.electoralcommission.org.uk/i-am-a-voter/your-election-information>

#### **Maxay yihiin macluumaadka ku jira Voter Authority Certificate ee bilaashka ah?**

Voter Authority Certificate ee bilaashka ah waxay muujineysaa magacaaga oo buuxa iyo sawirkaaga, oo golaha deegaanka bixiyey, qof si haboon kuu garanaya (tixraac ay ku jiraan lambarada iyo xarfaha golahu uu qoondeeyay), taariikhda la soo saaray iyo taariikhda la cusbooneysiinayo.

## **Waa maxay shuruudaha sawirka codsiga Voter Authority Certificate?**

Iyada oo qayb ka ah nidaamka codsiga Voter Authority Certificate, waxaad u baahan doontaa inaad keento sawir dhowaan ah. Shuruudaha sawirku waxay la mid yihiin shuruudaha sawirada baasaboorka waana inay muujiyaan madaxaaga iyo garbahaaga oo aan waxba daboolin madaxaaga – marka laga reebo inaad madaxa u daboolato sababo diimeed ama caafimaad. Wejigaaga waa in aanu daboolneyn sabab kasta oo jirta.

### Qaabka sawirka

Sawirku codsaduhu waa inuu noqdaa:

- Mid hore u jeeda si toos ahna u soo eegaya kameerada
- Si fiican u muuqdaan madaxa iyo garbaha, oo aan waxba daboolneyn madaxa – marka laga reebo inaad madaxa u daboolato sababo diimeed ama caafimaad. Wejigaaga waa in uuna daboolneyn sabab kasta oo jirta.
- Qof kale aanu ka muuqan
- Muuqaal too ah oo wajiga ah oo ay indhuhu furan yihiin oo si cad u muuqdaan, tusaale ahaan, ookiyaalo la'aan, oo ayna qarineyn timo.

Fadlan ogow tani ma khusayso marka codsaduhu aanu awoodin inuu bixiyo sawir kaas oo u hoggaansamaya intaas midkood ama labadooda shuruudahaas sababo naafo awgeed.

### Tayada sawirka

Sawirka codsaduhu waa inuu:

- Si dhab ah kuugu eeg.
- Uu leeyahay midab
- Lagu sawiro baagarown asal ah oo ifaya.
- Si qayaxan u muuqda oo nadiif ah
- Ka nadiif ah hadhka falaashka 'milicsi midab', kuwaas oo qarinya wajiga ama milicsi midab.
- Aan waxyeelo gaarsiisneyn.

### Cabbirka sawirka

Marka codsaduhu uu u codsanayo onlayn ahaan, sawirka uu bixinayo waa inuu ahaadaa :

- Ugu yaraan 750 pixels oo dherer ah iyo 600 pixels oo ballac ah
- Kuna jira fayl elektaroonik ah oo cabbirkiisu aanu ka badnayn 20MB

Marka codsaduhu uu ku codsanayo foomka warqadda, sawirku waa inuu ahaadaa :

- Ugu yaraan 45 millimitir oo dherer ah iyo 35 millimitir oo ballac ah
- Dhererkiisu waa inuusan ka badan 297 millimitir ballaciisuna 210 milimitir

## **Halkeen ka heli karaa taageerada codsiga Voter Authority Certificate ee bilaashka ah?**

Haddii aad u baahan tahay wax caawinaad ah oo ku saabsan codsashada Voter Authority Certificate ee bilaashka ah, sawir ka qaadista codsigaaga ama aad rabto inaad codsato foomka codsiga warqada ah, waxaad la xiriiri kartaa kooxda adeegyada doorashada ee golaha deegaankaaga.

Waxaad ka heli kartaa faahfaahintooda xiriirkooda adiga oo gelaya koodhka boostada halkan

<https://www.electoralcommission.org.uk/i-am-a/voter/your-election-information>

Waxaad ka heli kartaa macluumaad dheeraad ah halkan

<https://www.electoralcommission.org.uk/voting-and-elections/voter-id/applying-a-voter-authority-certificate>

## **Ma jiraa wakhti kama dambays ah oo lagu codsanayo Voter Authority Certificate ee bilaashka ah?**

Haa, waxaad codsan kartaa Voter Authority Certificate ama Dukumentiga Magac la'aanta ee codbixiyaha wakhti kasta, laakiin wakhtiga kama dambaysta ah ee codsiyada doorasho gaar ah waa 5-ta galabnimo, 6 maalmood oo maalmo shaqo ah ka hor maalinta codbixinta.

Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah, oo ay ku jiraan sida codsigaaga loo go'aamin doono, hubi hagitaanka Guddiga Doorashooyinka oo ay bixiyeen Saraakiisha Diiwaangelinta Doorashada:

<https://www.electoralcommission.org.uk/running-electoral-registration-england/voter-authority-certificates-and-anonym>

## Ma ugu isticmaali karaa Voter Authority Certificate si sawir Aqoonsi ahaana ama waxyaabo kale?

Maya, Voter Authority Certificate ujeedkeedu waa codbixin oo keliya looguma isticmaali karo caddaynta aqoonsiga sabab kale. Looma aqbali doono sida caddaynta da'da ama caddaynta ciwaan dukumeenti.

### Diiwaangelinta codbixinta

## Miyaan weli u baahanahay inaan isdiiwaangeliyo si aan u codeeyo anoo haysto sawirka Aqoonsiga si aan u codeeyo?

Haa, diiwaangelinta codbixinta ayaa ah tillaabada ugu horreysa ee aad ku muujineyso xuquuqdaada dimoqraadiga ah. Waxaad u baahan doontaa inaad isdiiwaangeliso si aad u codeeyo ka hor maalinta doorashada, markaa iska hubi inaad hore u sii diyaargarowdo!

## Sidee isku diwaangeliyaa si aan u codeeyo?

Si aad isu diiwaangeliso si aad u codeeyo waxaad booqan kartaa [www.gov.uk/register-to-vote](http://www.gov.uk/register-to-vote) adiga oo buuxinaya foomka onlaynka ah. Waxuu qaadanayaa dhowr daqiiqo oo kaliya. Waxa kaliya ee aad u baahan tahay waa lambarkaaga Caymiska Qaranka (National Insurance - NI). Nambarkaaga Caymiska Qaranka (National Insurance - NI) waxa loo isticmaalaa habka diiwaangelinta sida aqoonsi gaar ah, habka ugu fudud uguna dhaqsaha badan ee lagu xaqiijinayo qofka aad tahay. Laakin haka welwelin haddii aadan aqoon ama aadan haysan nambarka Caymiska Qaranka NI - kaliya reeb macluumaadkaada xiriirka intaad ku jirto habka diiwaangelinta onlaynka, golaha adeegyada doorashada deegaankada ayaa kula soo xiriiri doona.

Miyaan u baahanahay inaan keeno caddaynta aqoonsigayga si aan isugu diiwaan geliyo inaan u codeeyo?

Dhammaan codsiyada cusub ee isku diwaangelinaya inay codeeyan waxaa xogtoda lala barbar dhigayaa diiwaaka dowladda dhexe. Haddii aan la helin xogtaada, waxaa lagu soo diri doonaa codsiga 'Caddaynta aqoonsiga'. Waa inaad sida ugu dhakhsaha badan uga jawaab celiso, haddii kale waxaa laga yaabaa codsigaaga in la diido.

Caddaynta aqoonsigu waxay u baahan tahay in lagu gudbiyo onlayn ama ku daabacdo adeegyada doorashada degmadaada. Waxaad gudbin kartaa midkood:

- Hal "dukumentiyada aqoonsi oo Asaasiya", ama
- Hal "dukumentiyada dawladeed oo la hubo" iyo laba "dukumentiyada maaliyadeed/bulsho", ama
- Afar "dukumentiyada maaliyadeed/bulsho"

Dokumentiyada Aqoonsiga ee Asaasiga	
Dokumentiga	Qormo
Baasaboora	Waxii baasaboora hadda jira
Cadeynta ogolaanshiyaha deegaan	Ay bixisay UK oo kaliya
Kaarka aqoonsiga EEA	Waa inuu shaqaynayo
Kaarka sawir qayb ka ah shatiga gaari wadista ee aad hadda haysato	UK/Isle of Man/Channel Islands (asal ah ama ku meel gaara)
Kaarka Aqoonsiga Doorashada Northern Ireland	

Dokumentiyada dawladeed ee la Hubo	
Dokumentiga	Qormo
Warqad Nuucii hore ah ee shatiga gaari wadista ee aad hadda haysato	Kaliya UK



**Dokumentiyada dawladeed ee la Hubo**

Dokumentiga	Qormo
Sawirka Shatiga gaari wadista ee aad hadda haysato	Waxii aan ka ahayn UK iyo Crown Dependencies
Shahaadada dhalashada	Kaliya UK iyo Crown Dependencies
Shahaadada Guurka ama tan xiriirka madaniga ah	Kaliya UK iyo Crown Dependencies
Shahaadada adhobshanka/korsashada	Kaliya UK iyo Crown Dependencies
Shatiga hubka	Kaliya UK iyo Crown Dependencies
Warqada Damiinka Booliiska	Kaliya UK iyo Crown Dependencies

**Dokumentiyada maaliyadeed iyo kuwa tixraaxa bulsho**

Dokumentiga	Qormo	Taariikhda bixinta iyo shaqayta
Warbixinta daymaha mortigayjka	UK, Crown Dependencies, ama EEA	La bixiyey 12-dii bilee ugu danbeysay
Warbixin Bangi ama mid dhismo bulsho	UK, Crown Dependencies, ama EEA	La bixiyey 3-dii bilee ugu danbeysay
Bangi ama warqad xaqiijin furitaanka koonto dhismo bulsho	UK iyo Crown Dependencies	La bixiyey 3-dii bilee ugu danbeysay
Warbixinta kaarka daymaha	UK, Crown Dependencies, ama EEA	La bixiyey 3-dii bilee ugu danbeysay
Warbixin maaliyadeed (tusaale, daqliga hawlgabka ama damaanadqaad)	UK, Crown Dependencies, ama EEA	La bixiyey 12-dii bilee ugu danbeysay
Warbixinta Canshuurta ee Golaha	UK iyo Crown Dependencies	La bixiyey 12-dii bilee ugu danbeysay
Biilka korontada (marka laga reebo biilka teleefanka)	UK iyo Crown Dependencies	La bixiyey 3-dii bilee ugu danbeysay
Warbixinta P45 ama P60	UK iyo Crown Dependencies, ama EEA	La bixiyey 12-dii bilee ugu danbeysay
Warbixinta dheefaha (tusaale, dheefta caruurta, ama hawlgabka)	UK, Crown Dependencies, ama EEA	La bixiyey 3-dii bilee ugu danbeysay
Dawlada dhexe ama dawlada hoose, wakaalada dawlada, ama waaxda dawlada hoose ee bixisa xaquuqaha (tusaale, DWP, Job Centre Plus, HMRC)	UK, Crown Dependencies, ama EEA	La bixiyey 3-dii bilee ugu danbeysay



## **Ma haysto Lambarka Caymiska Qaranka. Ma isdiwaangelin karaa si aan u codeeyo?**

Haa, waxaad ka dalban kartaa qadka internetka ee diiwaangelinta codbixiyayaasha, laakiin waa inaad reebtaa faahfaahintaada. Golahaaga adeegga doorashada ayaa markaa kala soo xiriiri doona si ay u xaqiijiyaan aqoonsigaaga iyo siyaabo kale oo lagu dhamaystiri karo hawsha. Tusaale ahaan, waxaa laga yaabaa in lagu weydiiyo shahaado dhalasho, biilasha korontada ama warbixino bangi. Tani waxay ka dhigan tahay inaad weli isdiwaangelin karto si aad u codeeyso, xitaa haddii aadan gacanta ku hayn lambarkaaga Caymiska Qaranka.

## **Yaa iska diiwaangelin kara kana codayn kara London?**

Waad iska diiwaan gelin kartaa si aad u codeeyso haddii aad degan tahay (badanaa ku nooshahay) London oo aad jirto 16 ama ka weyn (laakin ma awoodi karaysid inaad codeeyso ilaa aad ka gaarto 18).

Hadda, British-ka, Irish-ka, Commonwealth-ka, muwaadiniinta Midowga Yurub iyo muwaadiniinta Midowga Yurub ee haysta xuquuqaha codbixinta ee degan London way isdiwaangelin karaan oona codayn karaan.

Iyada oo la raacayo [Jinsiyadda British-ka \(Eswatini, Gabon iyo Togo\) Sharciga 2023](#) kaas oo wax ka beddelaya Xeerka Jinsiyadda Dawlada Ingiriiska kaas oo dhaqan galay 15-tii Diseembar 2023, muwaadiniinta Togo iyo Gabon waxay hadda awood u leeyihiin inay isu diiwaangeliyaan si ay u codeeyaan sidii muwaadiniin Commonwealth xaq u leh.

Muwaadiniinta British-ka ee ku nool dibadaha kuwaas oo hore ugu noolaa ama hore isugu diiwaangeliye si ay uga codeeyaan London waxay xaq u leeyihiin inay isdiwaangeliyaan oo ayna u codeeyaan doorashooyinka Baarlamaanka UK iyagoo isticmaalaya ciwaankii ugu dambeeya ee ay ka deganaayeen London.

Waxaad ka hubin kartaa u qalmitaankada halkan

<https://www.electoralcommission.org.uk/i-am-a/voter/which-elections-can-i-vote>

## **Doorashooyinke ayaan codeyn karaa?**

Haddii aad tahay British, Irish ama muwaadin u qalma dhalashada wadamada Commonwealth/Barwaaqo sooranka oo ka weyn da'da 18 oo degan London, markaa waxaad ka codayn kartaa dhammaan doorashooyinka, oo ay ku jiraan doorashooyinka Guud/ Baarlamaanka UK iyo tan aftida, doorashooyinka golaha demada/ deegaanka London iyo Duqa magaalada London/ Doorashooyinka Golaha London.

Haddii aad tahay Muwaadin u qalma Dhalashada Yurubiyanka (EU) ama muwaadin ka soo jeeda Midowga Yurub ah oo haysta xuquuqda deegaanka kana weyn da'da 18 oo aad degan tahay London, markaa waxaad awoodaa kaliya inaad ka codayso doorashooyinka deegaanka, sida doorashooyinka golaha deegaanka London iyo Duqa Magaalada/ Doorashooyinka Golaha London.

Muwaaddinka Midowga Yurub (EU) u qalma waa muwaadin EU-da ee Danmark, Luxembourg, Poland, Portugal, ama Spain kaas oo haysta ogolaansho uu ku galo ama ku joogo UK, Channel Islands ama Isle of Man, ama aan u baahnayn ogolaansho.

Muwaaddin EU-da ee haysta xuquuqa codbixinta waa muwaadin EU-da ee u dhashay wadama kale oo EU ah kaas oo 31-tii December 2020 ama ka hor haystay ogolaansho uu ku galo ama ku joogo UK, Channel Islands ama Isle of Man, ama aanba u baahnayn ogolaansho, tan uu u socotay kala go'la'aan.

Ogolaanshaha lagu galo ama lagu joogo UK, Channel Islands ama Isle of Man (sidoo kale loo yaqaan Leave to Enter or Remain) oo loola jeedo xaalada sharci ee socdaalka.

Wixii macluumaad cusub ah halkan ka fiiri <https://www.electoralcommission.org.uk/>.

## **Ma sharuudbaa in aan 18 jir ahay si aan isu diiwaangeliyo una codeeyo?**

Maya, taas waa fikrad khaldan oo la wada aaminsanyahay. London, iyo England inteeda kale, waxaad isdiiwaangelin kartaa si aad u codeeyso laga bilaabo 16 jir, laakiin ma awoodaysid inaad ka codeeyso doorasho ilaa aad ka gaarto 18 sano.

## **Ma haysto cinwaan joogto ah. Ma is diiwaangelin karaa si aan u codeeyo?**

Haa, waad awoodaa. Dad badan ayaan haysan cinwaan ma rasmi ah ama joogto ah, qaarna waxaaba laga yaabaa inay hoy la'aan yihiin. Waad isdiiwaangelin kartaa si aad u codayso adoo adeegsanaya meesha aad ku leedahay xidhiidhka deegaanka inta ugu badan ama aad waqtigaaga ku qaadatid, adiga oo cadanaya xiriirkaada deegaanka. Waxaa jira foom gaar ah oo loogu talagalay diiwaangelinta kiiskan - waxaad ka heli kartaa halkan <https://www.gov.uk/government/publications/register-to-vote-if-you-havent-got-a-fixed-or-permanent-address>

## **Marka aan is diiwaangeliyo si aan u codeeyo, miyaan u diiwaan gashanahay markaa si ebidkey ah?**

Maya, waa inaad dib isu diiwaan gelisaa si aad u codayso haddii aad beddesho ciwaankaaga, magacaaga sharciga ah ama dhalashadaada. Dadka haysta laba Dhalasho (Dadka haysta laba dhalasho) waa in ay dib isu diiwaan galiyaan markay helaan dhalasho British-ka sababtoo ah waxa ay ku siineysaa xuquuq codbixin oo buuxda.

## **Ma waxaa jira waqti kama dambays ah oo la isku diiwaangelinayo si loo codeeyo?**

Waxaad isku diiwaangelin kartaa si aad u codayso wakhti kasta. Si kastaba ha ahaatee, codsigaaga isdiiwaangelinta degdega laguma habeynayo, markaa waxa fiican inaad isku diiwaangeliso sida ugu dhakhsaha badan ee ugu suurtoogalsan doorashooyinka soo socda. Taariikhda saxda ee diiwaangelinta codbixiyaha ee kama dambaysta ah ayaa hore loo sii xayeysiin doonaa, laakiin sida caadiga ah wakhtiga kama dambaysta ahi waa abaaro laba toddobaad ka hor maalinta doorashada

## **Haddii aan isku diiwaangeliyo inaan codeeyo, ma khasbaa inaan codeeyo?**

Codbixintu qasab kama ahan UK. Markaa, haddii aad isu diiwaangelisay inaad codayso waxaad u haysataa khiyaar inaad codayso ama aanad codeyn. Laakin ma codayn kartid haddii aanad marka hore u diiwaan gashanayn inaad codayso.

## **Faa'iidooyinka is diiwaangelinta codbixinta iyo haysashada sawir Aqoonsi oo la aqbalayo si aad u codeeyso**

### **Maxay yihiin faa'iidooyinka is diiwaangelinta codbixinta iyo helitaanka sawir Aqoonsi si aad u codeeyso?**

Is diiwaangelinta codbixinta waxay awood kuu siinaysaa inaad adeegsato xuquuqdaada aasaasiga ah ee dimuqraadiga ah, taas oo si adag loogu guulaystay aanay na heli karin dhammaan dadka reer London.

Inaad isu diiwaangeliso inaad codayso waxa ay sidoo kale sara u qaadaysaa kalsoonadaada deymaha sababtoo ah bixiyeyaasha deymaha ee mustaqbalka waxay awoodayaan inay tixraacaan diiwaanka doorashada si ay u xaqiijiyaan magacaaga iyo cinwaankaaga. Diiwaanka doorashada waxaa sidoo kale loo isticmaalaa in lagu xusho ka qaybgalayaasha adeegga xeerbeegtida - xeerbeegtiyada kala duwan ayaa u badan inay keenaan xukuno cadaalad ah.

Adiga ayaa go'aaminaya haddii aad rabto inaad codeeyso iyo haddii kale. Laakin, hubinta in aad isu diiwaangeliso inaad codayso oo aadna haysato sawir Aqoonsi oo la aqbalay si aad u awoodo inaad codeeyso, waxay kuu ogolaanaysaa in codkaaga la maqlo sida arrimaha adiga, qoyskaaga iyo bulshadaada, London iyo mustaqbalka dalkaba.

## **Xogteyda**

**Yaa arki kara xogtayda haddii aan is diiwaangeliyo si aan u codeeyo ama aan codsado Voter Authority Certificate ee bilaashka ah?**

Haddii aad u malaynayso in magacaaga iyo ciwaankaaga ku jira diiwaanka doorashada ay saamayn ku yeelan karaan badqabkaada, ama badqabka qof qoyskaaga ka tirsan, waxaad codsan kartaa inaad isu diiwaangeliso si aad codayso qaab magic la'aan ah. Tallaabooyinka loomaro habkan waxaad ka heli kartaa halkan

<https://www.electoralcommission.org.uk/voting-and-elections/who-can-vote/register-vote/register-vote-anonymously>

Haddii aad isu diiwaangelisay si magic la'aan ah si aad u codayso oo aadna rabto inaad shaqsi ahaan u codayso, waxaad u baahan doontaa inaad codsato **Dokumentiga Codbixiyaha Qarsoon**. Waxaad ka heli kartaa macluumaad dheeraada halkan

<https://www.electoralcommission.org.uk/voting-and-elections/who-can-vote/register-vote/register-vote-anonymously#anonymous-electors-document>

Haddii aad ka welwelsantahay amniga macluumaadkaaga shakhsiyeed, sida inaad ku jirto 'diwaan-xogeed furan' oo ay iibsana karaan qolo saddexaad, waxaad mar kasta awood u leedahay inaad 'ka baxdo' diiwaanka furan inta aad ku jirto habka is diiwaangelinta internetka. Waxaad ku jiri doontaa 'diwaanka dhamaystakiran' oo ay isticmaalaan adeegayaasha doorashada degmada (tusaale ahaan inay kuugu soo diraan kaararka codbixinta ka hor doorashada) iyo hubinta dalabyada amaahaha/ hubinta heerka daynta. Tani way ka duwan tahay inaad magic la'aan ku diwaan gashantahay, halkaas oo faahfaahintaadu aanay ka muuqanayn 'diwaanka furan' ama 'diwaanka buuxa' midna.

## **Hababka codbixinta**

### **Ma hababka kala duwan oo loo codeeyo ayaa jira?**

Markaad isu diiwaangeliso inaad codayso, waxaad shaqsi ahaan uga codayn kartaa goobta codbixinta maalinta doorashada; boostada ku codey (haddii aanad goobta ka dhowayn maalinta doorashada, tusaale ahaan, haddii aad fasax ku jirto); ama ha kuu codeeyo wakiil (taasoo macneheedu yahay inaad weydiisato qof kale oo aad ku kalsoon tahay inuu kuu codeeyo, tusaale ahaan haddii aad jirantahay).

Haddii aad wakiil ku codeynayso, waxaad kaga dalban kartaa onlaynka halkan <https://www.gov.uk/apply-proxy-vote>.

Haddii aad boosto ku codeynayso, waxaad kaga dalban kartaa onlaynka halkan <https://www.gov.uk/apply-postal-vote>.

Haddii aadan internetka ka dalban karin, waxaad ka soo dejisan kartaa oo aad buuxin kartaa foomka codsiga codbixinta wakiilka halkan <https://www.gov.uk/government/collections/proxy-voting-application-forms> ama foomka codsiga codbixinta boostada halkan <https://www.gov.uk/government/publications/apply-for-a-postal-vote> una dir Xafiiska Diiwaangelinta Doorashada ee deegaankaaga, ama codso in boostada laguugu soo diro foomka codsiga.

Waxaad ka heli kartaa faahfaahinta adeegyada doorashada degmadaada halkan <https://www.gov.uk/contact-electoral-registration-office>

### **Miyaan ugu baahanahay Aqoonsi sawireed dhammaan hababka codbixinta?**

Maya, uma baahnid inaad muujiso sawir Aqoonsi si aad ugu codeeyso boosto ahaa ama wakiil ahaan.

Wakiilkaaga ayaa u baahan doona inuu ku tuso sawirkiisa Aqoonsi goobta codbixinta, markay ku codeynayaan magacaaga. Si aad shaqsi ahaan ugu codeeyso goobta codbixinta waxaad u baahan doontaa sawir Aqoonsi oo la aqbalay si aad u codeeyso.

Si aad ugu codayso wakiil ahaan ama boosto ahaan waxaad uga dalban kartaa onlayn halkan <https://www.gov.uk/apply-proxy-vote> or <https://www.gov.uk/apply-postal-vote>.

Haddii aadan internetka ka dalban karin, waxaad ka soo dejisan kartaa oo aad buuxin kartaa foomka codsiga codbixinta wakiilka halkan <https://www.gov.uk/government/collections/proxy-voting-application-forms> ama foomka

codsiga codbixinta boostada halkan <https://www.gov.uk/government/publications/apply-for-a-postal-vote> una dir Xafiiska Diiwaangelinta Doorashada ee deegaankaaga, ama codso in boostada laguugu soo diro foomka codsiga

Waxaad ka heli kartaa faahfaahinta adeegyada doorashada degmadaada halkan <https://www.gov.uk/contact-electoral-registration-office>.

### **Waa maxay is beddelada ku yimid ku codaynta wakiilka ee aan u baahanahay inaan sii ogaado?**

Isbeddellada ku saabsan ku codeynta wakiilka waxay dhaqan gashay laga soo bilaabo 31-da Oktoobar 2023.

Hadda waxa jira xaddid inta qof ee hal qof uu wakiil uga noqon karo, taas oo ay ku jiraan xubnaha qoyskiisa. Waxaad ugu codayn kartaa wakiil ahaan ugu badnaan laba codbixiye oo fadhigoodu yahay UK ama ilaa afar codbixiye oo aan UK joogin (tusaale codbixiyaasha British-ka ee dibadda dagan).

Waxaad ka codsan kartaa qaar ka mid ah nuucyada codbixinta wakiilka onlayn ahaan <https://www.gov.uk/apply-proxy-vote>. Ma awoodi kari doontid inaad internetka ka codsatid haddii codsigaagu u baahan yahay caddayn (looga baahanyahay dadka u diiwaan gashan inay ku codeeyaan magic la'aan) ama haddii aad codsanayso codbixin degdeg ah oo wakiilnimo.

Haddii aadan internetka ka dalban karin, waxaad ka soo dejisan kartaa oo aad buuxin kartaa foomka codsiga codbixinta wakiilka halkan <https://www.gov.uk/government/collections/proxy-voting-application-forms> una dir Xafiiska Diiwaangelinta Doorashada ee deegaankaaga, ama codso in boostada laguugu soo diro foomka codsiga

Waxaad ka heli kartaa faahfaahinta adeegyada doorashada degmadaada halkan <https://www.gov.uk/contact-electoral-registration-office>.

Codsiyada onlaynka iyo kuwa waraaqaha labadaba waxay u baahan doonaan xaqiijin aqoonsi (marka laga reebo codaynta degdega ah ee wakiilka). Uma baahnid inaad keento sawir Aqoonsi si uu kuugu codeeyo wakiil (wakiilkaagu wuxuu u baahan doonaa sawir aqoonsi oo la aqbalay si uu ugu codeeyo magacaada). Waxaa jira xaqiijin aqoonsi oo kale, oo ay ku jiraan xaqiijinta saxiixaaga iyo taariikhda dhalashada.

Wixii macluumaad cusub ah oo ku saabsan ku codeynta wakiilka halkan ka eeg <https://www.electoralcommission.org.uk/i-am-a/voter/apply-vote-proxy>

Nidaamka badalasha ayaa jiri doona haddii aad leedahay qorshe jira oo uu kuu codeynayo wakiil. Waad cusboonaysiin kartaa wakiilka kuu codeynay adoo kala xiiiraya Xafiiska Diiwaangelinta Doorashada ee deegaankaaga halkan <https://www.gov.uk/contact-electoral-registration-office>.

### **Waa maxay is beddelada ku yimid ku codaynta boostada ee aan u baahanahay inaan sii ogaado?**

Isbeddellada ku saabsan ku codeynta boostada waxay dhaqan galeen laga soo bilaabo 31-da Oktoobar 2023.

Codsiga codbixinta boostada ee guuleysta waxa uu ansax kuu ahaanayaa inaad ku codeyso boostada ugu badnaan saddex sano. Saddex sano ka dib, waxaad u baahan doontaa inaad dib u codsato haddii aad rabto inaad ku sii codeyso boostada.

Waxaad ka dalban kartaa codbixinta doorashada onlaynka ama haddii aadan internetka ka dalban karin, waxaad kala soo dagi kartaa oona buuxin kartaa foomka codsiga boostada halkan <https://www.gov.uk/government/publications/apply-for-a-postal-vote> una dir Xafiiska Diiwaangelinta Doorashada ee deegaankaaga, ama codso in boostada laguugu soo diro foomka codsiga.

Waxaad ka heli kartaa faahfaahinta adeegyada doorashada degmadaada halkan <https://www.gov.uk/contact-electoral-registration-office>.

Uma baahan doontid inaad keento sawir Aqoonsi si aad boostada ugu codayso. Waxaa jira hubin Aqoonsi oo kale, oo ay ku jiraan xaqiijinta saxiixaaga iyo taariikhda dhalashada. Si aad u hesho macluumaadka cusub ee ku saabsan hubinta codbixinta boostada eeg halkan <https://www.electoralcommission.org.uk/i-am-a/voter/apply-vote-post>

Nidaamka badalasha ayaa jiri doona haddii aad leedahay qorshe jira oo aad ku codeyneyso boosto. Waad cusboonaysiin kartaa ku codeynta boostada markaa adoo kala xiiiraya Xafiiska Diiwaangelinta Doorashada ee degaankaaga halkan <https://www.gov.uk/contact-electoral-registration-office>.

Haddii aadan awoodin inaad boostada dhigto codkaaga boostada waqtiga saxda ah, waxaad u qaadi kartaa goobta codbixinta ama golaha deegaankaaga maalinta codbixinta. Codbixiyayaashu waxay awood u yeelan karayaan kaliya inay keenaan codkooda boostada, iyo codadka boost ee ilaa shan qof oo kale, goobta codbixinta. Ololeeyaashu waxay keeni karaan oo keliya codkooda boostada, iyo codadka boostada ilaa shan qof oo kale oo ah qaraabo dhow, ama qof ay siyaan daryeel joogto ah. Dhammaan shakhsiyaadka ku wareejinaya codadkooda boostada xafiisyada dawladda hoose ama goobaha codbixinta waxay u baahan doonaan inay buuxiyaan foomka soo celinta codbixinta boostada.

## **Hab nocee ah ayaa loomaraa u codaynta Duqa magaalda London iyo doorashada Golaha London?**

Xeerka Doorashooyinka (2022) ayaa isbedelo ku keenay nidaamka codeynta ee doorashada Duqa Magaalada London. Qaabka aan u codeyno Golaha London waxba iskama beddelin.

### **Doorashada Duqa Magaalada London**

Duqa magaalada London hadda waxaa lagu doortaa iyadoo la isticmaalayo nidaamka First-Past-the-Post oo micnaheedu tahay qofkii ugu codbata ayaa guulaysan. Waxaad u codayn kartaa hal qof, adigoo istalaab saaraya [X] goobaabinta ah horta musharraxa aad dooran lahayd. Qofka ugu codka badan ayaa wuxuu noqon doonaa Duqa Magaalada London. Nidaamkan waxa kale oo loo isticmaalaa doorashooyinka Baarlamaanka UK/ kuwa Guud ee UK.

Golaha London waxa uu ka kooban yahay 25 xubnood (Assembly Members-AMs) – 11 matasha caasimadda dhan iyo 14 ay soo doorteen golaha wakiilada deegaanka.

### **Xubnaha Golaha Wakiilada Deegaanka**

Xubnaha Golaha Wakiilada London waxa lagu doortaa iyadoo la isticmaalayo nidaamka First-Past-the-Post oo micnaheedu tahay qofkii ugu codbata ayaa guulaysan. Waxaad u codayn kartaa hal qof, adigoo istalaab saaraya [X] goobaabinta ah horta musharraxa aad dooran lahayd. Qofkii ugu codka bata ayaa noqon doona Xubintaada Golaha wakiilada London. Golaha wakiilad doorashadu waxay badanaa ka kooban yihiin labo ama saddex deegaan oo London ah.

### **Xubnaha Golaha London ee guud**

Xubnaha Golaha pan-London waxaa lagu soo doortaa iyadoo la isticmaalayo nidaamka Xubinta Dheeriga ah, taas oo tirada codadka xisbi kasta ay la ekeysiineyso tirada kuraasta AMs-ka ee uu xisbigaasi ku guuleysto.

Waxaad wax badan oo ku saabsan doorashada Duqa Magaalada London iyo Golaha London ka heli kartaa London Elects <https://www.londonelects.org.uk/changes-how-we-vote>

## **Ma isu diiwaangelin karaa inaan codeeyo haddii aan ku noolahay dibadda?**

Muwaadiniinta British-ka ee ku nool dibadaha ee hore ugu noolaan jiray ama hore ugu diiwaangashanaa inay ka codeeyaan London waxay xaq u leeyihiin inay is diwaangeliyaan oo ayna u codeeyaan doorashooyinka Baarlamaanka UK iyagoo isticmaalaya ciwaankoodii ugu dambeeye ee ay ka deganaayeen London.

Waxaad iska diiwaangelin kartaa si aad u codeyso halkan <https://www.gov.uk/register-to-vote>

Adeegayaasha doorashadu waxay xaqiijin doonaan aqoonsiga codsadaha waxayna hubin doonaan degaankii hore ama diiwaanka ciwaanka London ee uu sheegay.

Haddii aad u diwaangashan tahay sida adoo codeynaya adoo dibada jooga, waxaad u codayn kartaa qof ahaan haddii aad joogi doonto London maalinta doorashada ama codso inaad ku codeyso boosto ama wakiil.

Diwaangalinta codbixiyayaasha dibada waxay u baahan doonaan dib u cusboonaysiin 3-dii sanoba.

Waxaad wax badaan ka heli kartaa

halkan <https://www.electoralcommission.org.uk/voting-and-elections/who-can-vote/other-registration-options/voting-if-you-live-overseas>

## **Codeynta shaqsi ahaaneed**

### **Xageen ka heli karaa goobta Codbixinta?**

Haddii aad isu diwaangalisay inaad shaqsi ahaan u codayso, kaarka codeynta ayaa lagugu soo diri doona ciwaanka kuu diwaangashan maalinta doorashada ka hor. Kaarkan waxaa ku jiri doona ciwaanka goobtaada codbixinta ee lagu asteeyey - waxa kaliya oo aad ka codayn kartaa goobtaas, waxana ay u badantahay in ay noqoto goob dadweyne sida dugsi, goob diin ama xarun bulsho. Waxay furnaan doontaa inta u dhaxaysa 7-da subaxnimo ilaa 10-ka habeenimo ee maalinta doorashada. Ha ka welwelin haddii uu kaa lumo kaarka codbixinta - uma baahnid si aad u codayso (**haddii aadan isku diiwaangelin inaad ku codayso magac la'aan**) haddii aad heli karto goobtaada codbixinta adiga oo gelaya koodhkaada boostada halkan

<https://www.electoralcommission.org.uk/i-am-a-voter/your-election-information>

### **Maxaa ka dhici doona goobta codbixinta?**

Dhammaan goobaha codbixinta **waxay furan yihiin 7-da subaxnimo ilaa 10-ka habeenimo maalinta doorashada**. Qaarbaa waxay la haan karaan dad dadka codeynaya salaama oo soo dhaweeya ka hor inta aanay gelin goobta codbixinta waydiinayana dadka inay keenaan foomka sawirka Aqoonsiga ee la aqbalay si ay awood ugu yeeshaan inay codeeyaan shaqsi ahaan.

Markaad gasho goobta codbixinta, waxaad filan kartaa waxyaabaha soo socda:

- Xubin ka tirsan shaqaalaha ayaa ku weydiin doonta magacaaga iyo cinwaankaaga, oona hubin doona inaad ku jirto diiwaanka doorashada.
- Waxay ku waydiin doonaan inay arkaan sawirka Aqoonsigaaga, hubinna in la aqbalay (wixii macluumaad dheeraad ah halkan raac <https://www.electoralcommission.org.uk/voting-and-elections/voter-id/accepted-forms-photo-id>), iyo inuu kuu egyahay. Haddii aad u diiwaangashantahay inaad si magic la'aan ah ku codayso (wixii macluumaad dheeraad ah halkan raac <https://www.electoralcommission.org.uk/voting-and-elections/who-can-vote/register-vote/register-vote-anonymously>), waxaa lagu weydiin doonaa inaad tusto kaarkaaga codbixinta iyo Dukumentiga Codbixiyaha Magac la'aanta (AED). Meel gaar ah ayaa diyaar ahaan doonta haddii aad doorato in sawirka Aqoonsiga si gaar ah loo eego. Meesha waxay noqon kartaa qol gaar ah, ama meel lagu kala soocay shaashad, iyadoo ku xiran goobta codbixinta.
- Marka sawirkaaga aqoonsiga lagu guuleysto in la hubiyo, xubnaha shaqaalaha ayaa magacaaga istilaab ka saari doona diiwaanka oona ku siin doona warqadda codbixinta oo ay ku qoran yihiin musharaxiinta aad u codayn karayso. Waxa laga yaabaa in lagu siiyo in ka badan hal warqad codbixin haddii ay ka dhacayso wax ka badan hal doorasho goobtaada isla maalintaas.
- U qaad warqadaada codbixinta (ama waraaqaha) goobta codbixinta, si aad si qarsoodi ah ugu codeyso. Si taxadar leh u aqri tilmaamaha warqadda codbixinta. Doorashooyinka qaar waxay isticmaalaan habab kala duwan oo codbixineed, sidaa darteed waxaad u baahantahay inaad iska hubiso inaad si sax ah u buuxiso warqad kasta.
- Buuxi warqadaada codbixinta adigoo isticmaalaya qalinka lagaa siiyo goobta codbixinta. Waxa kale oo aad isticmaali kartaa qalinkaaga haddii aad rabto. Wax kale ha ku qorin warqadda, haddii kale codkaaga lama tiring doono. Haddii aad khalad samayso, ha galin warqadaada codbixinta sanduuqa codka. Weydii shaqaalaha goobta codbixinta inay kuu beddelaan warqadda codbixinta oo haddana buuxi.
- Markaad dhammayso, isku laab warqadaada codbixinta oo buuxsan oo ku rid sanduuqa codka.



## **Sidee loo hubin doonaa sawirka Aqoonsigayga haddii aan xirto wajigayga sababo diimeed awgood?**

Si ay ugu suurto gasho shaqaalaha goobta codbixinta inay ku hubiyaan inaad u egtahay sawirkaga Aqoonsiga, waxaa lagu waydiin doonaa inaad in yar iska feydo wajigaaga si ay u arkaan wejigaaga.

Waxaad waydiisan kartaa xubin dumar ah oo ka tirsan shaqaalaha inay hubiso sawirkaada Aqoonsiga haddii aad doorbidayso, shaqaalaha goobta codbixinta ayaana tan tixgalin doona, haddii ay suurtagal tahay.

Waxaad codsan kartaa in sawirkaada Aqoonsiga meel gaar ah lagu hubiyo. Meel gaar ah ayaa diraar ku ahaan doonaa goobta codbixinta ujeedadan awgeed. Codsiyada nuucaan ah waa in loo maareeyaa si gaar ah oo xushmad leh. Uma baahnid inaad bixiso sababta codsigan, mana aha in lagu waydiiyo inaad sharaxdo sababta.

Muraayad ayaa diyaar ahaan doonta si aad u hubiso wejigaagu si sax ah kuugu daboolan yahay ka hor intaadan ka tagin meesha gaarka ah.

Haddii aad diido inaad iska furto wejiga oo shaqaaluhuna awoodin inay hubiyaan sawirkaada Aqoonsiga, waxay ka dhigan tahay inaan lagu siin doonin warqadda codbixinta, sidaas darteed waxaa laga yaabaa inaad codayn kareyn.

## **Sidee loo hubin doonaa sawirkayga Aqoonsiga haddii aan xirto maaski sababo caafimaad awgood?**

Si ay ugu suurtagasho shaqaalaha goobta codbixinta inay ku hubiyaan inaad u egtahay sawirkaaga Aqoonsiga, waxa lagu waydiin doonaa inaad in yar iska saartid maaskiga si ay u arkaan wejigaaga. Shuruuddan waxay ku khuseeyaan haddii aad tahay codbixiye qaba cudurada difaaca-yarida ama aad maaskaro xidhato sababo kale oo caafimaad dartood.

Waxaad codsan kartaa sawirkaaga Aqoonsiga in si gaar ah loo hubiyo. Meel gaar ah ayaa diraar ku ahaan doonaa goobta codbixinta ujeedadan awgeed. Codsiyada nuucaan ah waa in loo maareeyaa si gaar ah oo xushmad leh. Uma baahnid inaad bixiso sababta codsigan, mana aha in lagu waydiiyo inaad sharaxdo sababta.

Haddii aad diido inaad iska furto maaskiga oo shaqaaluhuna awoodin inay hubiyaan sawirkaada Aqoonsiga, waxay ka dhigan tahay inaan lagu siin doonin warqadda codbixinta, sidaas darteed waxaa laga yaabaa inaad codayn kareyn.

## **Sidee bay shaqaalaha goobta codbixintu u go'aamin karaan in sawirka ku yaala Aqoonsigayga uu iigu egyahay sifiican?**

Shaqaalaha goobta codbixinta ayaa eegi doona sawirka ku yaal aqoonsigaaga iyo magaca si ay u hubiyaan inay isleeyihiin magacaga ku qoran diiwaanka doorashada. Haddii aadan hubin in sawirkaaga la aqoonsan kari doono, waxaad codsan kartaa Voter Authority Certificate oo bilaashka ah adoo gudbineysid sawirkaaga oo cusub. Wixii macluumaad dheeri ah ka eeg halkan

<https://www.electoralcommission.org.uk/i-am-a/voter/voter-id/applying-a-voter-authority-certificate>

Haddii arintaadu la xiriirto tilmaamta jinsigaaga, Voter Authority Certificate kuma jirto tilmaamta jinsiga.

## **Waxaan ahay codbixiye indhoole ah/ arag yar, maxaa taageero ah oo aan ka heli karaa goobta codbixinta?**

Iyadoo la raacayo Xeerka Doorashooyinka (2022), guddoomiyaha goob-doorasho- saraakiisha kormeeraya doorashooyinka - ayaa hadda looga baahan yahay inay sameeyaan qodobbo dadka naafada ah si ay ugu suurtagasho codbixin madax-bannaan oo u sireysan. Saraakiisha Celinta waa inay raacaan hagida Golaha Doorashooyinka ee diyaarinta.

Si loo taageero codbixiyayaasha indhoolayaasha iyo kuwa aragga, dhammaan goobaha codbixinta waxaa laga rabaa inay lahaadaan:

- Aaladda codaynta dadka aragga ka naafada ah
- Nuqul daabacan oo weyn oo warqadda codeynta ah si loo tixraaco
- Weyneysada aqriska



- Iftiin si fiican u baxsan
- Kaalmada shaqaalaha ee goobta codbixinta si ay kuugu hagaan goobta codbixinta iyo in lagu calaamadiyo codkaaga haddii loo baahdo.

Guddoomiyaha goob-doorasho waxaa sidoo kale looga baahanyahay inay sii ogaadaan waxa looga baahan yahay goobtooda ayna bixin karaan wixii qalab dheeri ah, sida aaladaha maqalka ah si ay ugu suurtagasho qofka inuu si madaxbanaan oo u sireysan u codeeyo. Ka akhriso wax badan oo ku saabsan hagida Guddiga Doorashooyinka ee Saraakiisha Celinta halkan

<https://www.electoralcommission.org.uk/guidance-returning-officers-assistance-voting-disabled-voters/ensuring-voting-accessible/providing-equipment-polling-station-enables-or-makes-voting-easier-disabled-voters>.

### **Sideed uga codsan kartaa habayn macquul ah goobta codbixinta?**

Waxaad weydiin kartaa shaqaalaha goobta codbixinta maalintaa, waxayna kugu caawin doonaan sida ugu fiican ee ay karaan. Si aad u hubiso in sida ugu macquulsan isugu kaa aadaan arimahagu, waxaad warqad u qori kartaa Sarkaalka Celinta deegaankaaga ama kooxda adeegyada doorashada deegaanka, si aad u ogaysiiso inaad u baahan tahay dib u habayn macquul ah si aad u awooddo inaad si madaxbanaan u codayso. Si aad u heshid macluumaadka meesha lagala xiriiri karto, waxaad isticmaali kartaa koodhka boostada ee Guddiga Doorashooyinka adoo adeegsanaya qalabka raadinta <https://www.electoralcommission.org.uk/i-am-a/voter/your-election-information> waxaad isticmaashaa warqadda ogeysiiska ee RNIB si aad ula xiriirto, halkan ayaa laga helikaraa [https://www.rnib.org.uk/documents/1604/Notification\\_template\\_for\\_individuals\\_to\\_send\\_to\\_Returning\\_Officers.docx](https://www.rnib.org.uk/documents/1604/Notification_template_for_individuals_to_send_to_Returning_Officers.docx)

Waxa kale oo la siiye qormo hagitaan shaqaalaha goobta codbixinta si loo caddeeyo in apps-ka moobeelka (sida "Seeing AI" Taas isticmaaleysa Aqliga Macmalka ah si ay u aqriso qoraallada daabacan), ama aaladaha weyneeya muuqaallada, oo ay isticmaali karaan dadka indhoolayaasha ah iyo kuwa aragga yar si ay u codeeyaan una helaan habab macquul ah.

### **Maxaan sameeyaa haddii aan caqabado kala kulmo goobta codbixinta?**

Haddii aad la kulanto wax caqabado ah goobta codbixinta ama aad rabto inaad faallo-celin ka bixiso khibradaada, waxaad la xiriiri kartaa kooxda adeegyada doorashada ee golaha deegaankaaga. Si aad ula xiriirto kooxda adeegyada doorashada ee deegaankaaga, geli koodh lambarkaada boostada halkan - <https://www.electoralcommission.org.uk/i-am-a/voter/your-election-information>

### **Ku codeynta magac la'aanta**

#### **Maxay tahay is diiwaangelinta qarsoodiga ah?**

Marka qof is diiwaangeliyo si uu u codeeyo, magaciisa iyo ciwaankiisu waxay ka muuqanayaan diiwaanka doorashada.

Haddii uu qofku ka walaacsan yahay in magaciisa iyo ciwaankiisa oo ku jira diiwaanka doorashada ay khatar gelin karaan ammaankooda, waxay codsan karaan inay isu diiwaangeliyaan si magac la'aan ah oo qarsoodi ah.

Sidan ayuu inta badan markii la geliyo uga muuqdaa diiwaanka doorashada:

FBC412 Vella, John 59 Green Lane  
BC413 Vella, Veronica 59 Green Lane

Sidaana waa sida xareynta magac la'aanta qarsoodiga ah uga muuqanayo diiwaanka doorashada  
BC602 N

'N' waxay u taagan tahay in diiwaangelintu la xiriirto codbixiye si magac la'aan oo qarsoodi ah u diiwaangashan yahay. Tani macnaheedu waa in dadka u diiwaangashan inay codeeyaan iyagoo aan magacooda sheegin ay awoodi doonaan inay codeeyaan, laakiin magacooda iyo cinwaankoodu kuma jiri doono diiwaanka doorashada.

## Ma isu diiwaangelin karaa si magac la'aan oo qarsoodi ah?

Qofkasta oo raba in uu isu diiwaangeliyo nuu codeeyo isaga oo aan magaciisa la sheegin waxa uu u baahan doonaa:

- Buuxinta foomka codsiga
- Sharaxaan sababta badqabkooda, ama badqabka qof ka mid ah qoyskooda, ay halis ugu jiraan haddii macluumaadkooda la gleiyo diiwaanka doorashada
- Soo gudbin caddayn taa oo taageereysa diiwaangelintooda
- U soo celinta foomka codsiga, sharraxaadda iyo caddaynta golaha deegaankooda

Waxaad kala soo degi kartaa hagaha is diiwaangelinta magac la'aanta qarsoodiga ah, oo la sameeyey iyadoo lala kaashanayo Gargaarka Haweenka (Women's Aid) halkan

<https://www.electoralcommission.org.uk/voting-and-elections/who-can-vote/register-vote/register-vote-anonymously> .

Waxaad ka heli kartaa foomka codsiga oo daabacan halkan

[https://www.electoralcommission.org.uk/sites/default/files/2021-02/Register-to-vote-anonymously-resident-in-England\\_0.pdf](https://www.electoralcommission.org.uk/sites/default/files/2021-02/Register-to-vote-anonymously-resident-in-England_0.pdf)

Haddii aad u baahan tahay in lagaa caawiyo si aad isu diiwaan geliso si aad u codayso magac la'aan ama qarsoodi, waxaad la xiriiri kartaa golaha deegaankaaga. Si aad u heshid faahfaahinta xiriirkooda, geli koodh lambarka boostada halkan <https://www.electoralcommission.org.uk/i-am-a/voter/your-election-information>

## Waxaan u diwaangashanahay inaan codeeyo magac la'aan ama qarsoodi, sidee bey shuruudaha sawirka Aqoonsigu u beddelayaan qaabka aan u codeynayo shaqsi ahaan?

Codbixiyaasha magac la'aanta ee raba inay shakhsi ahaan uga codeeyaan goobta codbixinta waxay u baahan doonaan inay soo saaraan Dukumeentiga Magac-la'aantee Codbixiyaha sida sawirkooda aqoonsi oo la aqbalay oo kale. Tani waa dukumeenti ka kooban lambarkaaga codbixiye ahaaneed iyo sawirka uu soo saaray Sarkaalka Diiwaangelinta Doorashada ee degaankaaga ka dib xaqiijinta aqoonsigaaga. Maadaama aa tahay Codbixiye Qarsoon ma isticmaali kartid foomam kale oo sawirk Aqoonsi oo la aqbalay ah. Waxaa lagaaga baahan doonaa inaad soo saarto kaarkaada codbixinta iyo dukumentiga codbixiyaha qarsoon markaad shaqsi ahaan u codaynayso.

Qof kasta oo hore ugu diiwaan gashanaa inuu u codeeyo si qarsoodi ah, ama isu diiwaangeliya inuu si qarsoodi ah u codeeyo doorashada ka hor, waxaa ogeysiin doonaa inuu codsado **Dokumentiga Codbixiyaha Qaroon** golaha deegaankooda. Waxaad sidoo kale la xiriiri kartaa golaha deegaanka si aad u codsato mid. Waxaad ka heli kartaa faahfaahintooda adoo gelinaya koodh lambarka boostada halkan

<https://www.electoralcommission.org.uk/i-am-a/voter/your-election-information>

## Sideen u codsan karaa Dokumentiga Cdbixiyaha Qarsoon?

Markaad codsanayso Dokumentiga Codbixiyaha Aqrsoon, waxaad u baahan doontaa inaad keento:

- Magaca
- Cinwaanka
- Taariikhda dhalashada
- Lambarka Ceymiska Qaranka

Haddii aadan aqoon Lambarkaada Ceymiska Qaranka, waxaad ka raadin kartaa warqadaha lacag bixinta ama waraaqaha rasmiga ah ee ku saabsan canshuurta, lacag siinta hawlgabka ama dheefaha. Haddii aadan awoodin inaad hesho, weli waad buuxin kartaa codsigaaga, waxaana lagu weydiin doonaa inaad keento nuucyo kale oo aqoonsi ah si loo xaqiijiyo aqoonsigaaga, oo ay ku jiraan shahaadada dhalashada, warbixinaha bangi ama biilka korontada. Golahaaga ayaa kula soo xiriiri doona si ay u diyaariyaan haddii aad ka tagto faahfaahinta xiriirkaaga.

Waxa kaloo waydiisan kartaa qof ku yaqaana inuu siiyo damiin/caddayn golaha deegaanka si ay u xaqiijiyaan aqoonsigaaga haddii aadan haysan wax caddayn aqoonsi ah oo kale oo la aqbalayo. Golaha deegaankaaga ayaa ku siin kara macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan cidda bixin karta damiin/caddayn. Waxaad ka heli kartaa faahfaahinta xiriirkooda adoo gelinaya koodh lambarka boostada halkan

<https://www.electoralcommission.org.uk/i-am-a/voter/your-election-information>

## Sidee ayuu u egyahay Dukumentiga Codbixiyaha Qarsoon?

Dokumentiga Codbixiyaha Qarsoon waxaa uga qoran korka ereyada 'Dokumentiga Codbixiyaha', mana sharaxayo xaaladda codbixiyaha sida inuu u diiwaangashan yahay inuu u codeynayo si qarsoodi ah.

Dokumentiga Codbixiyaha Qarsoon waxaa ku jira:

- Taariikhda la baxshay
- Sawirkaada
- Lambarkaada doorashada (oona ah lambarka ka muuqan doona diiwaanka doorashada beddelka magacaaga iyo cinwaankaaga)
- Garasho macquul ah (Taas oo isugu jira 20 xaraf iyo nambaro oo ay soo saartay aalada software-ka ay isticmaalaan Saraakiisha Diiwaangelinta Doorashada)

Haddii aad codbixiye qarsoon tahay, waxaad u baahan tahay inaad keento Dokumentiga Codbixiyaha Qarsoon markaad tagayso goobta codbixinta. Uma baahnid inaad soo qaadato nuucyo dheeraad ah oo sawiro aqoonsi ah oo la aqbalay.

## Maxaa ka dhici doona goobta codbixinta?

Codbixiyayaasha magac la'aanta ah waxay u baahan doonaan inay la yimaadaan kaadhka codbixinta iyo Dokumentiga Codbixiyaha Qarsoon marka ay tagayaan goobtooda codbixinta.

Markaad timaaddo, waxaa ku soo dhaweyn doona xubin ka mid ah shaqaalaha, kaasoo:

1. address Weydiinaya inaad tusto kaarkaaga codbixinta - uma baahnid inaad sheegto magacaaga iyo cinwaankaaga
2. Ka raadinaya lambarkaaga doorahsda diiwaanka
3. Document Hubinaya Dokumentigaada Codbixiyaha Qarsoon
4. Istilaab kaa saaray liiska, oo ku siina warqadaada codbixinta

Waxaa diyaar ku ahaan doonta goobaha codbixinta meel gaar si aad u hesho meel gaar ah oo lagu fiiriyo Dokumentigaada Codbixiyaha Qarsoon. Tani waxay noqon kartaa qol gaar ah, ama meel ay kala soocday shaashad gaar ah, taasoo ku xiran goobta codbixinta.

## Ma waxaa ku qasbanahay inaan si shaqsiya u codeeyo haddii aan isu diiwaangaliyey sida Qarsoon?

Maya, haddii aad doorbidayso inaad shaqsi ahaan uga codeyn goobta codbixinta, waxaad codsan kartaa ku codeynta boostada ama wakiilka. Sawirkaada Aqoonsiga loogaagama baahna si aad u codsato ama ugu codeyso boostada ama wakiil. Wakiilkaaga ayaa looga baahan doonaa inuu ku tuso sawirkiisa aqoonsiga oo la aqbalay goobta codbixinta si uu u awoodo inuu ku codeeyo magacaaga.

Si aad ugu codeyso wakiil ama boosto, waxaad u baahan tahay inaad ka codsato onlayn halkan

<https://www.gov.uk/apply-proxy-vote> or <https://www.gov.uk/apply-postal-vote>.

Haddii aadan internetka ka dalban karin, waxaad ka soo dejisan kartaa oo aad buuxin kartaa foomka codsiga codbixinta wakiilka halkan <https://www.gov.uk/government/collections/proxy-voting-application-forms> ama foomka codsiga codbixinta boostada halkant <https://www.gov.uk/government/publications/apply-for-a-postal-vote> una dir Xafiiska Diiwaangelinta Doorashada ee deegaankaaga, ama codso in boostada laguugu soo diro foomka codsiga.

Waxaad ka heli kartaa faahfaahinta adeegyada doorashada degmadaada halkan

<https://www.electoralcommission.org.uk/i-am-a/voter/your-election-information>

Si aad u hesho wax badan oo ku saabsan sida loo codeeyo magac la'aan/qarsoodi, eeg

halkan <https://www.electoralcommission.org.uk/voting-and-elections/ways-vote/how-vote-anonymously>.

## **Daabacaadaha Shariciga ah iyo kuwa Dhijitaalka ah (Legal and Digital Imprints)**

### **Maxay yihiin daabacaadaha shariciga ah iyo kuwa dhijitaalka ah?**

Daabacaadaha shariciga ah (alaabaha daabacan) iyo kuwa dhijitaalka ah (alaaba digitaalka ah) ee deegaanada daabacaadaha kuwaas oo masuul ka ah daabacaadda ololaha iyo kuwa siyaasadeed iyo cidda ay u xayeysiinayaan (tusaale, cidda bixisay lacagta) si ay u muujiyaan daahfurnaan. Sidaa darteed, haddii aadan hubin cidda isku deyeysa inay ku wargeliso ama ku saameeyso, waxaad hubin kartaa daabacaada.

Halkan wwaxaa ah tusaalaha naqshada daabacaada ee ay isticmaalaan dhamaan lammaaneheena gaarsiinta bulshada iyo deeq bixiyayaasha:

“Waxaa taageertay the Greater London Authority, City Hall, Kamal Churchie Way, London E16 1ZE. Daabacday oona xayeysiisay [magaca ururka], [Cinwaanka u diiwangashan uruka].”

Waxaad ka heli kartaa macluumaad badan oo ku saabsan daabacadaha halkan <https://www.electoralcommission.org.uk/imprints>

### **Wax yaabaha dheeriga ah iyo ilaha kale ee u furan codbixiyayaasha**

#### **Halkee ayaan ka heli karaa ilaha kale ee diiwaanka codbixiyaha iyo macluumaadka Aqoonsiga codbixiyaha?**

Sannad kasta, GLA waxay soo saartaa agab dhijitaal ah iyo kuwo daabacan oo ku qoran luuqadaha ugu badan ee bulshada London ku hadlaan. Waxaad ka heli kartaa GLA Democracy Hub <https://registertovote.london/>. Halkaa waxa kale oo aad ka heli kartaa agab loogu talagalay Dhagoolayaasha iyo dadka naafadaa ee reer

Guddiga Doorashooyinku waxuu sidoo kale soo saaraa midkiisa UK - oo ah macluumaad balaaran kuwaas oo aad ka heli karto halkan <https://www.electoralcommission.org.uk/>.

#### **Halkeen ka heli karaa macluumaad dheeri ah oo loogu talagalay codbixiyayaasha jinsiga badashay iyo kuwa aan jinsi gaar ahayn?**

Ka deeq-bixiye ahaan wejiga 1-aad iyo wejiga 2-aad ee barnaamijka ololaha deeqaha ee GLA Voter ID, LGBT Hero waxay abuurtay xarun Aqoonsiga Codbixiyaha oo leh agab loogu talagalay bulshooyinka LGBTQIA+, oo ay ku jiraan agabyo gaar ah oo loogu talagalay codbixiyayaasha jinsiga badashay iyo kuwa aan jinsi gaar lahayn. Waxaadna ka heli kartaa halkan <https://www.lgbthero.org.uk/pages/category/lgbtq-photo-voter-id-london-elections>

#### **Halkee ayaan ka heli karaa bulshooyinka kale – ilaha macluumaadka gaar ah?**

Traveller Movement waxay sidoo kale ka mid ahaayeen bulshooyinka GLA Voter ID, waxaadna ka heli kartaa ilahood Gypsy, Roma iyo Travellers halkan <https://travellermovement.org.uk/operation-traveller-vote>

Golaha Muslimiinta ee Britain ayaa soo saaray habraacyo laga heli karo halkan <https://mcb.org.uk/local-elections-2023-voter-id-and-face-coverings/>

Dhanka wejiga 2-aad ee GLA, New Europeans UK waxay sidoo kale sameeyeen waxyaalo dhexdhexaad ah oo ku qoran luqado kala duwan ee bulshooyinka Midowga Yurub (EU) si ay u taageeraan dadka reer London ee EU-da inay helaan xuquuqdooda dimuqraadiga ah. Kuwaani waxay ku diyaar yihiin halkan <https://neweuropeans.uk/voter-id-awareness/>

#### **Yey tahay inaan u codeeyaa?**

Dhammaan waxyaala iyo hawlaha la xiriira GLA - ololaha isku xirka wacyigelinta dadweynaha ee Aqoonsiga Codbixiyaha (Voter ID) iyo Toddobaadka Diiwaangelinta Codbixiyaha London (London Voter Registration Week) ee sanadlaha ah waa kuwo gebi ahaanba dhexdhexaad ah oo aan ahayn xisbi siyaasadeed. GLA, ama Shout Out UK

midna lama arki karaayo iyagoo taageeraya wax xisbi siyaasadeed ah ama musharrax ah, sidaas darteed, ma gudbino wax fikrada ah oo ku saabsan sida dadka reer London ay u codeynayaan.

Mid ka mid ah waxyaabaha ugu xiisaha badan ee ku saabsan is diiwaangelinta codeynta iyo hubinta inaad haysato sawir Aqoonsi oo la aqbalay si aad u awooddo inaad codbixiso waxay ku baraysaa inaad barato dadka kugu matali doona degaankaaga ama qaranka iyo inaad go'aansato cidda aad rabto inay ku matasho adiga iyo danahaaga. Waxaad ka samayn kartaa baaris adigu aad u matax banaantahay halkan <https://whocanivotefor.co.uk/> oo aadna go'aan kaada gaarto.

Xusuusnow, codbixintaadu waa codkaada codkaaduna waa muhiim! #CodeynL'aaniWaaCod'aaan